

# Tilmaamaha shakhsiyadka talaalka wada qaatay



Waxaa loo arkaa inaad talaalka dhamaysatay 2 todobaad kadib marka aad talaalka ugu danbeeya ee COVID-19 aad qaadatay.

**Talaalada labada jeer ah:** 2 todobaad kadib talaalka 2aad (labadii talaal ee aad qaadatay si wanaagsan ayay kuu ilaalinayaan).

**Talaalada marka kaliya ah:** 2 todobaad kadib talaalka (waxa aad u baahan tahay hal talaal oo kaliya si uu kuugu ilaaliyo si buuxda).

Si loo ilaaliyo amaanka dad badan oo aan weli u helin fursad ay isku talaalaan, waxaa jira xaalado ay tahay inaad qaado talaaboojin taxadir leh.

## Marka aad wada qaadato talaalka:



Waxa aad booqan kartaa guryaha oo waxa aad u dhawaan kartaa dadka kale ee talaalka wada qaatay, iyada oo aanad ka warwarayn inaad qof qaadsiiso.



Waxa aad booqan kartaa qof ku jira khatar yar oo aan weli la talaalin, adiga oo aan xidhnayn waji gashad ama aydaan kala fogayn.



Maaha inaad gasho karantiin ama inaad dalbato shaybaadh hadii aad u dhawaato qof qaba COVID-19, iyada oo aad yeelato astaamaha marka aad u dhawaato kadib moojee (kuwaas oo badnaa aan dhicin).




CORONAVIRUS  
UTAH.GOV

## Si aad u ilaalso amaanka dadka kale ilaa inta dad badan ay is talaalayaan:



Xidho waji gashadka oo ka fogow marka aad la joogto dadka kale ee aan la talaalin weli oo ku jira khatar ay ku qaadayaan xanuun daran ama la nool qof khatar badan ku jira.



Xidho waji gashad oo ka fogow marka aad joogto meelaha dadku isku yimaadaan ilaa inta ay dad badan fursad u heleyaan ay isku talaalaan.



Iska ilaali meelaha saxmada iyo dadka badan iskugu yimaadaan. Xidho waji gashad oo kala fogaada ilaa inta macquulka ah hadii aad dad badan ku dhaw dahay.



Talaalada COVID-19 waxay wax ka taraan kahortaga xanuunada daran, dhigista isbitaalka, iyo dhimashada uu keeno fayrasku. In kasta oo ay yartahay in la yeesho astaamaha COVID-19, waa inaad is baadhaa.



Raac taxadirada ganacsiyada iyo cidda loo shaqeeyo waxa ay kuu sheegtey. Waxay yeelan karaan shaqaale ama macaamiil aan weli la talaalin, ama kuwo ku jira khatar sare oo xanuun daran ah.



Hadii aad socdaalayo, waxa aad raacdaa wixii shuruudo ah ee goobta aad u socdaalayo ah.

Waxaa laga soo qaataay tilmaamaha CDC. <https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/vaccines/fully-vaccinated.html>

